

# Washington State Governor's Office of the Education Ombuds: Qorshaha Istaraatiijiyada

(Agoosto 2020-2023)



## Muhiimadaha Istaraatiijiga ah

### Xalinta Dadban ee Khilaafka

OEO (Xafiiska Gudoomiyaha Gobolka Washington uqaabilsan Fududaynta Waxbarashada) wuxuu caawiyaa qof kasta oo su'aalo ama walaacyo ka qaba dugsiyada dadwaynaha ee K-12 ee Washington. Waxaan ku siin karnaa xog, tixraacyo, agabka macluumaadka, iyo ilaha kale ee xogta.

Shaqada sharci ee OEO waa in la yareeyo dul-duleelada ka jira fursadaha. Qorshaheena istaraatiijiyada ayaa muhiimada siinaaya adkaynta cadaalada waxbarashada, gaar ahaana bulshooyinka saamaynta ugu badan uu ku reebay COVID-19. Waxaan diirada saaraynaa ilahaheena kooban ee xalinta khilaafaadka, sida dhexdhexaadinta dadban iyo tababarka, ee ardayda fasalada K-12 ee:

- Ka maqan dugsiyada, ayna ku jiraan ardayda naafada ah ee maalmaha gaarka ah barta dugsiyada
- Dadka aan cadaanka ahayn, Madoowga, ama dadka reer guriga ah
- Dadka hooy la'aanta ah
- Ardayda ku jira daryeelka dad ehel ah ama dad aan dhalin
- Dhalinta ku jirta cadaalada carruurta ama nidaamyada dhaqan celinta dhalinta
- Soo galootiga, qaxootiga, magangalyo doonka, ama muhaajiriinta, ama ardayda ama qoysaska luuqadooda koobaad aysan Ingiriiska aheyn, ama
- Ardayda hela taageerooyinka Wraparound with Intensive Services (WiSE, Barnaamijka Adeegyada Waawayn) ama Children's Long Term Inpatient Programs (CLIP, Barnaamijyada Bukaana Jiifka Muddada dheer ee Carruurta)

### Istaraatiijiyadaha:

*In si firfircoon xariiro loola sameeyo qoysaska, ardayda, iyo bulshooyinka raadinaaya cadaalad waxbarasho oo ay ka helaan dugsiyada si loo dhagaysto waxna looga barto khibradahooda iyo awoodahooda.*

*In la abuuro agab oonleen ah oo dheeraad ah si looga jawaabo su'aalaha guud ee ka baxsan muhiimadaheena caawimaada tooska ah*

*Aqoonso fursadaha abuurista isbadelka nidaamka ayadoo la adeegsanaayo walaacyada shaqsiyada ah ee nalasoo gaarsiyo*

### Iskuxirka

Muhiimadaheena iskuxirka ayaa raacaaya bulshooyinka muhiimada lagu siinaayo xalinta khilaafka. Waxaan sidoo kale abuur doonaa agab iyo qalab quseeya xaaladaha ka baxsan qorshaha istaraatiijiyada si loo taageero qoysaska, iyo ardayda, iyo macalimiinta si wadajir ah.

### Istaraatiijiyadaha:

*Inaan kala shaqayno bulshada, qoyska, ardayga, iyo ururada macalimiinta, iyo sidoo kale wakaaladaha dawlada, si loo qabto munaasabadaha iyo aqoon kororsiyada*

*In la adkeeyo xariirada socda ee u dhaxeeya ururada iyo qoysaska iyo kooxaha ardayda, ayadoo sidoo kale la kordhinaayo wacyiga gobalka oo dhan ee OEO*

*Inaan adeegsano qaab sheeko sheekid ah oo awood badan si aan ula wadaagno khibradaha qoyska iyo ardayga macalimiinta, siyaasad dajiyaasha, iyo qoysaska kale iyo bulshooyinka*

### U doodista Xeerka

Waxaan aqoonsan doonaa aana abuur doonaa fursado kor loogu qaadaayo cadaalada adag, cadaalada naafada iyo caafimaadka dhimirka, helitaanka luuqada ee nidaamka dugsiyada. Waxaan soo gelin doonaa fikradaha iyo walaacyada ardayda, qoyska, iyo bulshada doodaha xeerka iyo go'aanada.

### Istaraatiijiyadaha:

*Waxaan kala shaqayn doonaa ururada bulshada, qoysaska, iyo ardayda kahortaga isir nacaybka, awood sheegashada, iyo qaababka kale ee guumaysiga*

*Inaan wax ka barano ayna na hogaanshaan bulshada, qoyska, iyo fikradaha ardayga oo inta badan aan lagusoo darin xeer samaynta*

*Inaan u adeegsano doorkeena hogaaminta ee aqoon kororsiyada si aan ugu doodno codka qoyska iyo ardayga*

HIGSIGA: Waxaan higsanaynaa nidaamka waxbarashada dadwaynaha oo meesha ka saaraaya isir nacaybka, xoog sheegashada, iyo takoorada kale si loo taageero himilooyinka ardayda kasta ee mustaqbalka.

Waxaan qadarinaa madax banaanideena, mabaadii'deena kahortaga isir nacaybka, iyo u gurmashada bulshooyinka. Waxaan wax ka baran doonaa koox ahaan qoysaska, ardayda, iyo bulshooyinka waxaana kor u qaadi doonaa higsigaan.

### SHAQADA

Waxaan kala shaqaynaa qoysaska, bulshooyinka, iyo dugsiyada si wax looga qabto dhibaatooyinka si wadajir ah si markaas arday kasta uu si buuxda uga qaybgalo uuna hormar ugu sameeyo dugsiyada dadwaynaha ee K-12 ee Washington.

### DOORARKEENA

Inaan dhagaysano walaacyada aana wax ka qabano su'aalaha la xariira nidaamka waxbarashada dadwaynaha ee K-12.

Inaan adeegsano qaababka xalinta khilaafaadka ee dadban si aan u taageero dhibaataada xalinta aana kor ugu qaadno cadaalada waxbarashada

Inaan bixino tababar, fududayn, iyo tababar ku aadan wada shaqaynta qoyska iyo bulshada iyo u doodista nidaamyada

Inaan xog soo aruurino aana aqoonsano waxyaabaha jira si aan u hagno talooyinkeena xeerka waxbarashada

Xafiiska Gudoomiyaha Gobolka Washington  
uqaabilsan Fududaynta Waxbarashada

**Education  
Ombuds**

Waan dhageysanaa. Waanu ogeysiinaynaa. Waxaan gacan ka geysanaynaa xalinta dhibaatooyinka.  
Khadka taleefanka: 1-866-297-2597 Oonleen ahaan: [www.oeo.wa.gov](http://www.oeo.wa.gov)